

JAWAABTA CANADA OO DHAN EE COVID-19


Ilaa markuu cudurka korona fayraska cusub soo baxay, Wakaalada Caafimaadka Dad waynaha ee Canada iyo masuuliyiinta caafimaadka dad waynaha gobolada iyo dhulalka waxay ka shaqaynayaan si wada jir si loo xaqiijiyo hab la isku duba riday si loo yaraano faafida fayraska oo loo yareeyo saamayntiisa uu ku leeyahay dad waynaha—gaar ahaan kuwa ugu itaalka daran— iyo nidaamkeena caafimaadka.

U diyaargarowgeena gurmada ah iyo tallaabooyinka jawaabta waxaa ku jira:



SHABAKADHA SHAYBAADHKA

Isticmaalka teknoolajiga unkamaysa si loo horumariyo oo sare loogu qaado awooda baadhitaanka wadanka oo dhan ee COVID-19.



DABAGALKA

Aqoonsashada xaaladaha iyo taabashadooda si loo raad raaco cudur gaadhida oo looga warhayo ku faafida bulshadda markaas masuuliyiinta caafimaadka dad waynaha waxay qaadi karaan tallaabo degdeg ah oo yoolka la saarayo.



CILMI BAADHIDA

Wax ku biirinta dedaalka caalamiga ah in si wanaagsan loo fahmo COVID-19 si loo horumariyo qalabka baadhida cusub, tallaalka, iyo daawaynta.



TALLAABOYINKA CAAFIMAADKA DAD WAYNAHA

Tallaabooyinka sare u qaadida ee xirfad yaqaanada daryeelka caafimaadka, shaqaalaha, bulshooyinka iyo qof kastaba ay tahay inuu qaado si ay nafahooda uga ilaaliyaan iyo kuwa kaleba jirrooyinka, oo lagu yareeyo faafida fayraska—tusaale, nadaafada gacmaha, qaabka qufca, is go'doominta iyo kala durkinta bulsheed.



U DIYAAR GAROWGA DARYEELKA CAAFIMAAD

Ururinta ilaha, sida maaskareetada qaliinka, gaashaanka wejiga, dawooyinka iyo shaqaalaha caafimaadka dhammaan Canada meesha loo baahdo.



WADA XIDHIIDHKA IYO WACYI GELINTA

Bixita macluumaad wakhti habboon, la aamini karo, la heli karo iyo caddaynta la wargeliyay in dadka reer Kanada u baahan yihiin inay nafahooda ilaaliyaan, qoysaskooda, bulshooyinkooda iyo ganacsiyada.



XADKA IYO CAAFIMAADKA SAFARKA

Aqoonsashada dadka safarka ah kuwaas oo jiran, iyo wacyi gelinta dhexda dadka safarka ah ee gelaya Canada inay naftooda go'doomiyaan, laga warhayo astaamah cudurka oo ay qaadaan tallaabada ku habboon hadduu ay muujiyaan astaamaha cudurka.

WIXII MACLUUMAAD DHEERAADA AH EE KU SAABSAN CUDURKA KORONA FAYRASKA:

☎ 1-833-784-4397 @ canada.ca/le-coronavirus @ canada.ca/coronavirus